

Maxay sameeyn kartaa dowladda (Hoose) deegaanka si ay u caawiyaan?



Social Cohesion Guide for Local Government

Ka mid ahaanshaha dowladda deegaanka

Dowlada deegaanka waxay matashaa bulshooyinka deegaanka, waxay ka caawisaa dadka inay dareemaan sida inay ka mid yihiin, oo lagu daray, ay noqon karaan nafsadooda oo ay ka qeybqaataan bulshada. Gollaha deegaanka ayaa si toos ah kala shaqeeyo dagayaasha arimaha deegaanka, oo ay ku jiraan xalalka bulshada hogaamiso iyo barnaamijyada taageerada bulshada gaarka u ah. Barnaamijyadaan ayaa ku jiri karo taageerada:

- guriyeynta, guri la'aanta
- helitaanka dagayaasha curyaanka ah
- xarumaha bulshada
- ku tabarucida
- badqabka bulshada
- kala duwan, Māori, Dadka Jasiiradaha, muwaadaniinta waayeelka ah, dhalinyarada, bulshooyinka aaminaada
- fanka iyo dhaqanka

Bulsho walboo aad ku jirtid – haddii ay tahay jidkaaga, dariskaaga, kooxda, ururka xirfadlaha, dugsiga, goobta caabudida- ama kooxda dhaqanka – waxay dareentaa wanaag ka mid ahaanshaha, dareentid in loo dhanyahay, ahaatid nafsadaada iyo wax ka mid ahaanshaha.

Dhammaanteen waan kala duwannahay, laakiin waxaan rabnaa inaan isla socono, u dabaaldagno kala duwanaanshaheena oo aan ixtiraamno dadka kale markii aan qilaafno. Tani waa muhiim sababtoo ah ma ahan in qof walba uu dareemo inay noqon karaan cida ay yihiin ama aaminsanyihiin in codkooda la maqli doono.

Waxaan nahay wadan aad u kala duwan oo ay ku nool yihiin bulshooyin badan oo kala duwan, waxaana loo baahan yahay in la helo qaabab aan isku dhegeysanno oo aan is maqalno. Waxaan rabnaa inay naga go'naato inaan fahamno kala duwanaanshaheena iyo awoodaheena oo aan ka shaqeyno waxa na mideeya iyo waxa isku keyn soo dhaweeyo.

Ka mid ahaanshaha

– waxa ay u egtahay

Bulsho ay dadka si fiican isku fahmaan, oo aan: is naqaano, naqaano dariskeena, dareeno goobo shaqo loo dhanyahay, oo aan naqaano meesha aan u aadno caawin markii aan u baahannahay. Waxaan dareenaa inay noo suurto galeyso inaan la hadalno dadka aan caadi ahaan ula hadlin, aan ka hadalno markii aan maqalno dad dhahayo waxyaabo takoorid ah, oo aan xor u nahay inaan la wadaagno cida aan nahay, halka aan ka nimid, iyo sida aan waxyaabaha u sameeyno. Markii ay dhibaato jirto qofna gadaal ugama tagno – oo qof walbaa lagu daro.

Dhisida ka mid ahaansho badan

– waxa aad sameeyn kartid

Haddaba, maxaan ka sameeyn karnaa dowlada deegaankeena si aan ugu caawino dad badan ka mid ahaanshaha, qaadanaa kala duwanaanshaha, ka qeybqaadano, aamino dadka kale, dareeno ku xirnaan iyo ixtiraam?

Ka mid ahaanshaha, aaminaada dadka kale

- la shaqeyno lwi iyo ururada pan-Māori, iyo NGO-yada si aan u abuurno qaababka hogaamiyo deegaan ahaan ee ka caawinayo dadka ka mid ahaanshaha, ee heerka deegaanka.
- qaado waqtiga lagula kulmayo bulshooyinka boosaskooda ee waqtiyada iyaga ku haboon si loo dhiso aaminaad iyo xiriirada:
 - tusaale ahaan, Hindisaha Koonfurta ee Gollaha Auckland ayaa isu keeno shaqaalaha gollaha deegaanka, qoysaska, bulshooyinka, NGO-yada iyo ganacsiyada si ay u helaan xalalka caqabadaha bulshada iyo dhaqaalaha ee South Auckland.

Qaadashada kala duwanaanshaha, dareemida ixtiraam

- ku dhiiro geli hogaamin loo dhanyahay iyo tababarka aqoonta dhaqanka ee shaqaalaha loogu tallogalay, oo ay siiso boosaska bulshada geli karaan ee bulshooyinka ku xirmaan.

Tusaalooyinka waxaa ku jira:

- ku biirista Barnaamijka Bulshooyinka Soo dhaweynta Muhaajiriinta New Zealand
- isticmaalida Taituarā (haraan loogu yaqiinay Maareeyayaasha Bulshada Dowldada Deegaanka) kala duwanaanshiyaha iyo barnaamijka dhisidda kartida loo dhanyahay 'Leap'.
- isticmaalida Adeega Xogta Fayo qabka Bulshada Taituarā si aad u fahamtid xaalada hadeer ee fayo qabka bulshadaada iyo meesha aad xooga saari kartid dadaaladaada lagu hormarinayo.

Dareemida ku xirnaanta

Ku dhiiro geli kooxyada kala duwan inay si wanaagsan uga wada shaqeeyaan si ay u bixiyaan:

- maalgelinta deeqda la heli karo ee munaasabadaha bulshada oo leh shuruudaha wargelinta ee saamiga
- xarunta adeegyada kireysiga bulshada la dhimay ama bilaashka ah
- munaasabadaha bulshada bilaashka ah
- maalgelinta ama boos bilaash ah ee loogu tallogalay xaafadaha iyo bulshooyinka si ay u maamulaan munaasabadaha Maalinta Xaafada.

ka qeybqaadashada

- yeeshaan munaasabadaha la tashiga fudud oo aad loo heli karo waqtiyada dadka u shaqeeya (ka dib 5pm maalmaha shaqada, iyo maalmaha fasaxa ah), lala xiriir bulshooyinka, lagu xoojiyo matalaada Māori go'aan qaadashada, oo bixiya aqoon is weydaarsiyada waxbarashada madaniga bilaashka ah oo u hogaaminta doorashooyinka ama inloo siiyo maalgelin waxbarashada madaniga si aad balaaran.
- qabtaan kulamada imaanshaha dhammaadka isbuuca ee hormarinta qorshaha dowlada deegaanka muddada dheer oo wada noolaanshaha bulshada.

- wax badan ka baro Te Reo Māori, taariikhda Aotearoa New Zealand iyo Te Tiriti o Waitangi, adigoo isticmaalaya app-yada onleenka bilaashka ah sida Kōrerorero, Kupu iyo Ako Tahi ama iska diiwaan geli koorsada Te Wānanga o Aotearoa, booqo bandhigyada taariikhda ee madxafka deegaankaaga, ama ka amaaho maktabada deegaankaaga taariikhda NZ
- la yeelano wada sheekeysii dhiiran qof muujinayo hab dhaqan takoorid ah. Illaha ku jira websaydka Komishanka Xuquuqaha Aadanaha ayaa noqon kara mid waxtar leh, sida [Ka Jawaabida Cunsuriyada](#).
- raadi hindisayaasha tababarka ee shaqaalaha iyo wakiilada kale.
- codso arjiyada maalgelinta ee hay'adaha dowladda si aad u maalgeliso mashruuca bulshadaada, [COGS](#) ama [Hay'adda Baqtiyaa Nasiibka](#) iyada oo loo marayo [nidaamka maareynta deeqaha](#) ama iyadoo loo marayo [Barnaamijka Hormarinta Bulshada Hogaamiso](#).

